

SINNAANSHA LA'AANTA BIYAHA EE DAAMI, HARGEYSA: SHEEKADA BIYAHA





ANIGA LA'AANTAY WAA DHIMASHO,

HADDIII AAN MEEL KU BOTO'NA...

WAA LA MID.



LAAKIIN ADIGA NOLOL
BAAN KUU SIDAA.



WAXAAN KU NOOLAHAY DHULKA HOOSTIISA.
GUNTA MEEL DAM AH OO QABBOW.



ILAA, MARKA SI DEG-DEGA INTA LA II
KALA JIIDO, IFTIINKA AAN USOO BAXO.



WEY YIMAADAAN.



WEY I QAATAAN. LAKIN
IYAGU IMA LAHA.



WAXA AAN HADDA KA IMI DOOXOYINKA GEED-DEEBLE WAXAN KU SOCDA
HARGEYSA, ANIGOO SII MARAYA WADDOOYIN CIDHIIDHI AH OO DAYACAN.



MAR DHINAC BUU JIDH-KAYGU U CIIRAYAA
OO KU DHACAYAA DHINACYADA.



'AAYAR. IMIKA AAYAR -- HA DAADIN'
MULKIILAHA AYAA YIDHI.



An illustration showing a man on the left holding a blue mobile phone to his ear, looking angry. In the background, a red truck with a white trailer is driving on a road. The sky is light blue with a few birds and clouds. The ground is orange and yellow. On the right, a woman is also on a mobile phone, looking thoughtful.

LAAKIIN MACAAMIISHU MA SUGI KARAAN.
BAAHIDA AY II QABAAN WAA DEGDEG.

'DHAKHSO!' AYEY
YIDHAAHDEEN.

WAAN SOO SOCDA. BAAHIDA
AAD II QABTAAN WAAN OGAHAY.

DHULKAN LAFTIISU AAD BUU IIGU HEELAN YAHAY.



WAXAYNU U SOO DHAWAANAY XAAFADA DAAMI.



MARKA HORE QAYB WEYN OO IGA MIDA
AYEY QAATAAN, WAXAYNA KA BUUXIYAAN
TANGIYADA AY LEEYIHIIN TAAJIRIINTU.



KOOBABKODII BAA DAREERAY.



DHULKA AYAAN KU SAYDHAYMAY.

WAY I KHASAARIYEEN.





CIDNA IMA LAHA. SIDA HAWADA OO KALE AYAAN
LAGAMA MAARMAAN UGU AHAY NOLOSHA.

CID WALBA INAAN GAADHO AYAAN DOONAYAA.



DADKA OOMAN SI AAN UGU TAGO.

SI AAN U NADIIFIYO, OO
AAN U HARAAD-TIRO.


CUNAHOODA HOOS UGU DAADAGYO
IYO JIDHKOODANA U DULMARO.

DAAMI WAXAA KU NOOL BADRIYA.

WEY II BAAHAN TAHAY.
CARRURTEEDA AYAA II BAAHAN.

LAAKIIN INYAR UUN BAAN KA
GAADHAA -- OO WASAKH LEH
WEYNA IGU XANUUNSADAAN.



An illustration of a woman with dark skin, wearing a red headscarf, looking out over a landscape. The background features a yellow and orange sky with stylized green and blue clouds. In the distance, there are green trees and a yellow tent with a blue arched entrance. The woman is in the foreground, looking towards the right.

HADII AAD AWOODI
KARO WAXAAN DABCAN IIBSAN
LAHAA BIYO IGU FILAN OO MUDDO
I HAYN KARA LAKIN QIIMUHU AAD
BUU QAALI U YAHAY WEYNA SII
QAALIYOOBAYSAA.

HADDA BADRIYA IYO QOYSKEEDU WAXAY KU TIIRSAN
YIHIIN GABADH NAXARIIS BADAN OO DUKAAN YAR LEH.



WAXAY IGU KAYDISAA TAANI WEYN
OO U DHAW GURIGA BADRIYA.

JIRIKAANKA 20 LITIR AH WAXAY IGA SIIN JIRTAY LABA KUN OO
SHILLIN, LAKIN IMIKA WAXAY IGU TAAGAN YIHIIN 2500 SHILLINGS.

SHIDAALKII AYAA QAALIYOOBAY.

WAXAA JIRA DHUUMO. WAA LA SOO DHIGAY,
LAAKIIN WAXAY YALAAAN CIID IYO BOODH ENGEKAN.



MUSUQMAASUQ IYO KARTI LA'AANTU WAXA AY
KA DHIGAAY REER HARGEYSA KUWO HARAADAN.

LAAKIIN WAXAAN KU RIYOODAA MAALINTA AAD DHUUMAHAA DHEX MARAYO OON
GAADHAYO QASABADAHA IYO JIDHKA DHULKUNA NOQONAYO CAGAAR MAR LABAAD.



IYAGU IMA LAHA. IMA HAYSAN KARAAN.
WAXAAN KA TIRSANAHAY NOLOSHA OO DHAN.

ISKUDUBBARIKDA CILMI-BAADHISTA:

AYAN YUSUF (IPCS)

QORAHA SHEEKADA:

KARRIE FRANSMAN

FARSHAXAN:

MARIA SURDUCAN

SOOSAARE:

KARRIE FRANSMAN

SOOSAARIDDA:

TOGAN/TABAN

AGAASINKII:

DR. BENJAMIN WORKU-DIX

MAALGELINTII:

MASHRUUCA KAABAYAASHA LOO DHAN YAHAY EE MAGAALOYINKA WAXA GADHWADEEN KA AH JAAMACADDA SUSSEX, UK WAXAANA MAALGELIYAY UK RESEARCH AND INNOVATION IYADA OO KAASHNAYSA SANDUUQA GLOBAL CHALLENGES RESEARCH FUND, TIXRAACA MASHRUUCA REF: ES/TO08067/1



MASHRUUCA KAABAYAASHA DHAQAALE EE LOO DHAN YAHAY EE
MAGAALOYINKA WAXA UU BAADHAA SIDA BIYAHA, FAYADHOWRKA,
TAMARTA, GAADIIDKA IYO KAABAYAASHA ISGAARSIINTA SI SIMAN
LOOGA HELI KARO XAAFADAHA AADKA U FAQIIRKA AH.

SI AAD WAX BADAN UGA OGAATO BOOQO
INCLUSIVEINFRASTRUCTURE.ORG.

